Soo koobitanka Deeqda Baahiyaha Isku-dhafan ee Dayeelka Ilmaha ee 2025-26

Xaqiiqooyin Kooban

- Codsiga CCCNF ee sannadka 2025–2026 waxaa la furay Diseembar 8, 2025, waxaana la xiray Janaayo 20, 2026.
- Miisaaniyada DCYF waxay ahayd $7.67 milyan.
- Waaxda Caruurta, Dhalinyarada iyo Qoysaska (Department of Children, Youth & Families, DCYF) waxay heshay 915 codsi oo codsanaya in ka badan $28 milyan oo maalgalin ah.
- DCYF waxay darajaysay codsiyada u qalma iyada oo la isticmaalayo Deeqda Baahiyaha Isku-dhafan ee Daryeelka Caruurta.
- DCYF waxay abuurtay gudi dib u eegis ah oo takhasuslayaasha ee mawduuca ah si ay u kala mudnaan siiyaan codsiyada kama dambaysta ah si ay u sameeyaan go'aanada maalgalinta.
- Go'aaminta maalgalinta ugu dambeeya ayaa mudnaan la kala siiyay:
- Codsiyada lahaa wadarta guud ee dhibcaha ugu badan.
- Codsiyada buuxiyay ujeedadii deeqda iyadoo soo saaraysa saamaynta ugu fiican ee caruurta leh baahiyaha isku dhafan.
- Abaalmarinada CCCNF ee 2025-26 waxay maalgelin doontaa 244 codsi (137 xarumaha daryeelka caruurta, 97 guri qoys oo ruqsad leh, 5 Daryeel Bixiyayaasha Qoyska, saaxiibka, iyo deriska (Family, Friend, and Neighbor, FFN), iyo 5barnaamij qabiil) oo dhan $7.69 milyan*.

  * $22,669 oo ka mid ah miisaaniyadda CCCNF ee Sannad-maaliyadeedka 2027 ayaa loo isticmaalay in si buuxda loo maalgeliyo dadka loo ansixiyay deeqda.

Macluumaadka Taariikh ahaaneed

Ujeedada Deeqda Baahiyaha Isku-dhafan ee Daryeelka Ilmaha (CCCNF) waa in la horumariyo deegaan loo wada dhan yahay oo xadidan iyadoo la taageerayo bixiyeyaasha u adeegaya carruurta dib u dhaca koriinka, naafada, baahiyaha hab-dhaqanka, ama baahiyaha kale ee gaarka ah.

DCYF waxay furtay codsiga Deeqda Baahiyaha Isku-dhafan ee Daryeelka Ilmaha December 8, 2025. Codsigu wuxuu ka codsaday daryeel bixiyayaasha inay sharaxaan baahi kasta oo gaar ah ama hab-dhaqanka ilmaha ku jira daryeelkooda oo ay sharaxaan qorshahooda lagu taageerayo caruurta leh baahiyaha isku dhafan. Daryeel bixiyeyaashu waxay codsadeen maalgelinta qaybta kharashka ee ku haboon qorshahooda baahiyaha caruurta.

Intii lagu jiray muddadii lixda toddobaad ahayd ee codsigu furnaa, DCYF waxay heshay jawaabo badan. Daryeel bixiyeyaasha gobolka oo dhan ayaa soo gudbiyay 915 codsi oo codsanaya in ka badan $28 milyan. Baahida loo qabo taageerada caruurta leh baahiyo isku dhafan ayaa wali ah mid cad.

Ka Shaqaynta Codsiyada

DCYF waxay adeegsatay hannaan dhowr tallaabo ka kooban si ay u qiimeyso codsiyada. Marka hore, codsiyada waxaa laga baaray u-qalmitaan iyo dhammaystirnaan. Kadib, codsiyada u qalma waxaa si toos ah mudnaan loo siiyay oo loo gudbiyay heerka kama dambaysta ah, ama waxay mareen hab dhibco lagu qiimeeyo. Habka mudnaanta tooska ah iyo habka dhibcaynta waxaa lagu sharaxay hoos iyo Jadwalka Qiimeynta (Scoring Rubric). Ka dib baaritaankii hore iyo mudnaan-siintii, guddi dib-u-eegis ah oo ka kooban khubaro aqoon gaar ah u leh mawduuca ayaa dib u eegay dhammaan codsiyadii kama dambaysta ahaa, kuwa si toos ah mudnaanta loo siiyay iyo kuwa dhibcaha sare helayba, si ay u gaaraan go'aamada maalgelinta

Baaritaanka Codsiyada

DCYF waxay ka baartay dhamaan codsiyada la soo gudbiyay ee u-qalmitaanka iyo dhammaystirnaanta. Qandaraaslehu wuxuu turjumay codsiyada lagu soo gudbiyay luuqado aan Ingiriisi ahayn.

Daryeel bixiyeyaasha waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda si ay ugu gudbaan talaabada xigta:

- Haysashada ruqsad ama shahaado shaqaynaysa
- Hada waa inay u adeegaan caruurta leh baahida hab-dhaqanka, dib u dhaca koriinka, naafada, ama baahiyaha kale ee gaarka ah.
- Daryeel bixiyeyaasha qoyska, saaxiibada, iyo dariska (FFN) ee ruqsada laga dhaafay waa in ay ugu yaraan hal ilmo u adeegeen kaabitanka afar ka mid ah lixdii bilood ee la soo dhaafay ama laba ka mid ah sadexdii bilood ee la soo dhaafay oo ay codadaan kabitaanka Nidaamka Lacag bixinta Adeega Bulshada (Social Service Payment System, SSPS) wakhtiga codsiga.

Sababaha codsiyada aan u qalmin ay u gudbi waayaan waxaa kamid ah:

- Codsigu ma dhamaystirnayn (macluumaad ayaa ka maqan).
- Wadarta codsiga maalgalinta la codsaday ayaa ka baxsan inta ugu yar/ugu badan ee nooca xarunta.
    - Xarumaha daryeelka caruurta iyo guryaha qoyska ee ruqsada leh waxay codsan karaan inta u dhaxaysa $5,000 iyo $50,000.
    - Daryeel bixiyeyaasha FFN waxay codsan karaan inta u dhaxaysa $100 iyo $2,000.
- Codsiga FFN ma uusan buuxin shuruudaha kabitaanka ee ku qoran shuruudaha u-qalmitaanka.
- Codsiga waxaa lagu sheegay in aysan jirin caruur leh baahiyo isku dhafan oo hada diiwaangashan.
- Codsiga daryeel bixiye lagala laabtay ruqsada wakhtiga dib u eegista codsiga.
- Codsiga waxaa kamid ah codsiyada alaabta ama adeegyada aan la ogolayn. Si aad dib ugu eegto habraacyada qaybaha kharashka, fadlan booqo buug-yaha Deeqda Baahiyaha Isku-dhafan ee Daryeelka Caruurta.

- Codsigu wuxuu codsaday qadar maalgalin ah oo aan la mid ahayn miisaaniyada/qorshaha kharash garaynta.

Mudnaanta Tooska ah (Heerka Finalist-ka)

Qaar ka mid ah codsiyada si toos ah ayay ugu gudbi doonaan marxaladda dib-u-eegista ugu dambeysa iyada oo aan la dhibcayn. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- Barnaamijyada Waxbarashada Hore ee Qabiilada
    - Barnaamijyada shatiga leh, shahaado leh, ama keliya loogu shahaadeeyay bixinta lacagta oo leh xiriir qabiil.
- Barnaamijyada ku yaal Koodhadhka Boostada ee Mudnaanta Leh
    - Bixiyeyaasha ku yaal koodhadhka boostada ee lagu aqoonsaday inay yihiin deegaano ay carruurta Madow, Asal-raac, iyo midabkale si aan sinnayn ugu diyaarsanayn fasalka ilma-yaraha (kindergarten).

Codsiyada u qalma ee soo haray waxay u gudbaan talaabada xigta ee darajaynta.

Darajaynta Codsiyada

Koox ka kooban lix shaqaale DCYF ah ayaa sameeya darajaynta codsiga iyaga oo ku salaynaya kaliya nuxurka iyo shuruudaha tilmaamaha darajaynta. DCYF waxay daabacday hagitaanka darajaynta codsiga si ay daryeel bixiyayaasha u ogaadaan sida saxda ah ee codsigooda loo darajaynato.

Codsiyada waa inay helaan **sagaal dhibcood ama ka sareeya** si loogu gudbo marxalada mudnaanta siinta.

Mudnaan siinta

DCYF waxay heshay in ka badan $28 milyan oo codsiyo maalgalin ah. Iyada oo la heli karo $7.67 milyan, DCYF waxay mudnaanta siisay codsiyada u qalma ee helay tirada guud ee dhibcaha ugu sareeya. Intaa waxaa dheer, DCYF waxay xaqiijisay in liistada loo xushay kama dambaysta ay ku jiraan codsiyada u qalma ee nooc kasta oo daryeel bixiye ah.

Wadarta tirada ee dhibcaha waxaa lagu xisaabiyay celcelis ahaan dhibcaha codsadaha ee qayb kasta oo kharash ah iyadoo la adeegsanayo shuruudaha hagitaanka.

Codsiyada loo soo xusho kuwa kama dambaysta ah waxaa la horgeeyay gudiga dib u eegista si loo go'aamiyo maalgalinta.

Gugiga Dib u eegista

DCYF waxay abuurtay guddi dib u eegis ee takhauslayaasha mawduucyada si ay u qiimeeyaan codsiyada kama dambaysta ah si ay u gaaraan go'aanada maalgelinta.

Guddiga dib-u-eegista waxaa ka mid ahaa khubaro ka socday qaybaha soo socda:

- Ruqsadaynta Daryeelka Carruurta (Child Care Licensing)

- Waxbarashada Hore ee Qabiillada (Tribal Early Learning)
- Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta (Child Care Subsidy Program)
- Khubarada Helitaanka Luuqadaha (Language Access Specialists)
- Barnaamijka Waxbarashada iyo Kaalmada Carruurnimada Hore (ECEAP) (Early Childhood Education and Assistance Program)

Gudigu waxay sameeyeen qiimayno gaar ah oo ku saabsan codsi kasta oo kama dambaysta ah oo ay mudnaanta siiyeen codsiyada in lagu abaalmariyo maalgalin.

Gudigu waxay dib u eegeen oo inay keenaan dhibcaha codsi kasta oo kama dambaysta ah iyada oo lagu salaynayo:

A) Codsigu miyuu fuliyaa ujeedada Deeqda Baahiyaha Isku-dhafan ee Daryeelka Caruurta?

B) Marka laga reebo kuwan kama dambaysta ahaan loo xushay, codsigan gaarka ah ma soo saari doonaa saamaynta ugu fiican ee caruurta leh baahiyo isku dhafan?

Codsiyada helay dhibcaha ugu sareeya ee mudnaanta gudiga ayaa la siiyay abaalmarin.

Go'aanada Maalgalinta

DCYF waxay awooday inay maalgaliso 244 codsi! DCYF waxay ku abaalmarisay $7,689,357* ilaa 137 xarumaha daryeelka ilmaha, 97 guri qoys oo ruqsad leh, 5 FFN, iyo 5 barnaamij qabiilka dhaladka ah.

Abaalmarintan waxay keentay $5.34 milyan oo loogu talagalay Ku Daritaanka Shaqaalaha ama Kordhinta Saacadaha Shaqaalaha, $565,859 ee Adeegyada Daawaynta, $437,740 Horumarinta Xarunta si loogu hogaansamo helitaanka adeegyada ee waafaqsan Xeerka Dadka Naafada ah ee Maraykanka (Americans with Disabilities Act, ADA) ama Baahiyaha Hab-dhaqanka, iyo $1.35 milyan oo loogu talagalay agabka iyo Qalabka Taageerada iyo La Qabsiga.

* Wadar ahaan $22,669 oo ka mid ah miisaaniyadda CCCNF ee Sannad-maaliyadeedka 2027 ayaa loo isticmaalay in si buuxda loo maalgeliyo dadka loo ansixiyay deeqda ee wareegga deeqda 2025–26.

Soo Koobitaanka Kaabitaanka

Xaalada Kaabitaanka	Wadarta Tirada	Wadarta Cadadka
Kaabitaanka Xarumaha Daryeelka Caruurta	126	$3,873,930
Bixiyaha Guriga Qoyska ee Ruqsada Leh	88	$2,870,536
Kaabitaanka FFN	5	$8,625
Wadarta Kaabitaanka	**219**	**$6,753,091**
Xarumaha Daryeelka Caruurta ee Gaarka loo leeyahay ee Mushaharkooda La Bixiyo	15	$548,562
Guryaha Qoyska ee Ruqsada leh ee Mushaharkooda La Bixiyo	10	$387,704
Xarumaha FFN ee Gaar loo Leeyahay ee Mushaharkooda La Bixiyo	0	$0
Wadarka Mushaharka Lagu Bixiyo Goobaha Gaarka Loo Leeyahay	**25**	**$936,266**

Shaqaalayntu waa qaybta maalgelinta ee inta badan la codsado.

DCYF waxay filaysaa inay furto wareeg cusub oo Sanduuqa Baahiyaha Adag ee Daryeelka Carruurta (Child Care Complex Needs Fund) dabayaaqada sannadka 2026.